



## Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### **WARSAXAAFADEED 014/2011**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay oo soo dhoweeyay warka ah in Al-Shabaab ay ka baxeen magaalada Muqdisho**

Nayroobi, 06 Agoosto 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilسان arrimaha Soomaaliya, Dr. Augustine Mahiga, ayaa soo dhoweeyay warka ah in kooxaha hubaysan ee Al-Shabaab ay billaabeen inay ka baxaan magaalada Muqdisho ayna durbaba baneyeen meelo waaweyn oo istaraatiji ah ee magaalada, oo uu ka midyahay Suuqa Bakaaraha.

“Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ka warhelo horumarka dhowrkii maalmood ee la soo dhaafay laga gaaray xaaladda amaanka magaalada Muqdisho. Wuxaan shaki ku jirin in bixitaanka Al-Shabaab uu horumar wax ku ool ah iyo tallaabo loo qaaday dhanka habboon u noqon doono magaaladan soo martay dhibaato iyo burbur fara badan,” ayuu yiri Dr. Mahiga. “Laakiin anagoo ku hanweyn horumarkan haddana waxaa muhim ah inaan garowsano in khatar dhab ah, oo ay ka midyihiin weeraro argagaxiso, ay weli jirto, waana inaan la dhayalsan.”

Tobanaan kun oo Soomaali ah ayaa ku qurbaxay qalalaasaha taagan awgiis, in ku dhow kala bar dadkaasna waa carruur da'doodu ka yartahay shan sanno. “Arrinta mudnaanta kowaad leh hadda waa inay noqotaa in diiradda la saaro xaaladda baniaadanimo, waxaana ugu baaqayaa dhammaan dhinacyada kala duwan, sida bulshada deeqbixiyeyasha iyo dhammaan qaybaha kala duwan ee Dowladda Federaalka KMG, inay sameeyaan wax alla wixii karaankooda ah si ay u xaqiijiyaan una fududeeyaan in kaalmada si degdeg ah loo gaarsiyo dadka aadka ugu baahan”, ayuu tibaaxay Dr. Mahiga.

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu sidoo kale ugu baaqay Dowladda Federaalka KMG inay fursaddan ka faa'iideysato si ay u ballanqaaddo amaanka dadweynaha una sameyso wax alla wixii ay awooddo si ay u kaalmeysa una ilaaliso dadka rayidka ah.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

Dr. Mahiga wuxuu dhammaan kooxaha hubaysan xusuusiyay baaqii Golaha Amaanka, ee lagu caddeeyay Bayaankii Guddoomiye (Qaraarkii) ee la soo saaray 11kii May 2011, oo ahaa inay hubka dhigaan kuna biiraaan geeddi socodka, oo ugu dambeyntii ah furaha xasillooni waarta ee ka dhalata Soomaaliya.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)